

Isbeddellada Guud ee ugu Muhiimsan

Sida ay sheegtey Shabakadda Ka Sii Digista Abaarta ee FEWSNET, roobabkii *Deynta* ee 2009ka (Oktoobar – Disembar) ayaa dhammaadkii Sebtembar/horraantii Oktoobar ka bilowdey degaanno badan oo ku yaalla waqooyiga, waqooyiga-bari iyo goobo kooban oo ku yaalla gobollada bartamaha ee Soomaaliya. Arrintan ayaa tilmaameysa in roobabkaas oo aad loogu baahnaa ay waqtigoodii ka soo hormareen waxaana la rajeynayaa in ay meelo badan oo Soomaaliya ka mid ah ay ka fududeeyaan saameyntii abaartii haysey. Saadaasha roobka ee toddobaadka soo socda ayaa tilmaameysa roobab dhexdhexaad ah ilaa kuwo waaweyn oo ka di'i doonaan dhulka sare ee Itoobiya. Arrintan ayaa kordhin karta heerarka biyaha ee webiyada Shabeelle iyo Jubba, taas oo keeni karta fatahaado goobo gaar ah, gaar ahaan goobaha gebiyada webigu ay jilicsan yihiin. Xafiiska Isduwidada Hawlaha Bani'aadamnimada ayaa fududeynaya geeddi-socod Qorshe Loogu Diyaar-garoobayo Daadadka taas oo looga jawaabayo daadadka imaan kara. Ilaa waqtigan, waaxaha Biyaha, Fayadhowrka iyo Nadaafadda (WASH), Caafimaadka, Cuntada, iyo Beeraha iyo Nolol-raadsiga ayaa soo saarey qorshayaal diyaargarow.

Toddobaadka dhexdiisa, WHO ayaa xaqiisey in laba xaaladood oo Daacuun ah lagu arkey cusbitaalka Banaadir ee magaalada Muqdisho. WHO ayaa sheegtey in muddadii u dhaxaysey 26kii Sebtembar ilaa 2dii Oktoobar, ay 80 xaaladood oo Shuban-Biyood Ba'an iyo hal xaaladood oo geeri ah oo shubankaas la xiriirta looga soo waramay isla cusbitaalkaas. Ilaa 65 boqolkiiba xaaladahaas (52) ayaa ahaa carruur ka yar shan sano jir.

9kii iyo 10kii Oktoobar, ayaa wararku sheegayaa in ugu yaraan 15 qof ay ku dhinteen iskudhacyo soo cusboonaadey oo kooxaha Islaamiyiinta ku dhex marey meel 70km koonfur ka xigta magaalada Kismaayo, ee gobolka Jubbada Hoose. Iskudhacyadaan ayaa yimid waqti ay Al Shabaab iyo Xisbul Islaam ay ku dhawaaqeen xabad-joojin ka dib iskudhacyadii toddobaadkii hore ka dhacay magaalada Kismaayo ee keeney geerida in ka badan 15 qof iyo dhaawaca ugu yaraan 50 kale. 14kii Oktoobar, ugu yaraan 12 qof ayaa lagu diley waxaana lagu dhaawacay 22 kale dagaallo Islaamiyiin ku dhexmarey magaalada Matabaan, ee gobolka Hiiraan.

Waxqabadka

UNICEF, WHO iyo Hay'ad ay Kala Shaqeysa Caafimaadka Dadweynaha ayaa ka jawaabaya daacuunka ka dilaacey Banaadir. Ilaa 97 ceel-biyood oo ku yaalla magaalada Muqdisho iyo waddada Afgooye ayaa koloriin lagu darey. Hay'adaha ayaa sidoo kale soo dhammeystirey in sahaydii sahayda maareynta xaaladaha ay ku sii diyaariyaan goobaha ku habboon iyo in ay bixiyaan farriimo caafimaad oo laga sii daynayo idaacadaha degaanka.

UNICEF ayaa ka jawaabaysa wararka sheegaya shuban ka dilaacay gobollada Sanaad, Togdheer, Saaxil iyo Awdal iyada oo ay iskaashanayaan Wasaaradda Caafimaadka iyo Shaqaalaha. UNICEF waxaa ay sidoo kale xirmooyinka wax ka qabashada shubanka ay hore ugu sii diyaarisay dhammaan gobollada Somaliland. 8dii – 14kii Oktoobar, UNICEF waxa ay kormeer ku soo martey degmada uu Shuban-biyoodka Ba'an uu saameeyey ee Ceel-Afweyn ee gobolka Sanaad iyada oo ay isla socdaan maamulka degaanka. Kooxda kormeerka sameynayey ayaa booqdey toddoba tuulo iyaga oo u qeybiyey budada koloriinta si loogu nadiifiyo ilaha biyaha, waxaana ay hawl-wadeennada degaanka iyo shaqaalaha caafimaadka ku tabaareen koloriin-ku-daridda ilaha biyaha, iyaga oo qoysaskana u qaybiyey kiniiniga *aqua tab* ee biyaha lagu nadiifiyo.

WFP iyo la-hawlgalayaasheeda ayaa 585 metrik ton oo cunto ah u qaybiyey 105,120 ka-faa'iideystayaal, taas oo hoos imaaneysey cunto-qaybinta guud iyo cunto-shaqo-ku-beddelashada gobollada Nugaal, Mudug iyo Sool iyo gobolka Hiiraan ee Koonfurta/Bartamaha Soomaaliya. Magaalada Hargeysa, ayaa koox

hawlgal WFP ka socota oo ka koobneyd Saraakiisha La-socodka/kor-joogteynta iyo Qiimeynta iyo La-socdayaasha/kormeerayaasha Cuntada Gargaarka ah ee Soomaaliland ka fulinayaan hawl la-socod/kor-joogneyn tijaabo ah iyaga oo adeegsanaya agab xog-ururin oo cusub oo loogu talogaley in lagu sii wanaajiyo la-socoshada waxqabadyada mashaariicda nafaqeynta iyo kuwo cunto-shaqo/tababar-ku-beddelashada.

Toddobaadka dhexdiisa, hay'adda *Danish Refugee Council* ayaa bilowdey in ay agabka aan cuntada ahayn u qaybiso 7,775 qoys oo ah barokacayaal ku nool waddada Balcad, Kax Shiiqaal, Kuliyaddii Beeraha, Carbiska iyo Dibiley ee magaalada Muqdisho.

La soo xiriir: Faahfaahinta dheeriga ah ee afka Ingiriisiga, kala soo xiriir: Rita Maingi +254 734 800 120 – maingir@un.org.
Af-Soomaaliga ama Ingiriisiga, kala soo xiriir Muna Maxamed + 254 733 643 737 – mohamed26@un.org